FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

*DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA*

لـولايــة أرض بـونـت الـصـومـال

Sannadka 2 aad Garoowe, 1 Febaraayo 2000 **Lam. 2**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA** جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

---

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

---

**TUSMADA**

**Qaybta Koowaad**

**Sharci**

- **Sharci Lam.** 6 ee 23/01/2000, kuna saabsan Qaynuunka Caafimaadka Puntland ............ **Bogga. 30 - 36**
- **Sharci Lam.7** ee 23/01/2000, kuna saabsan Dhismaha Rugta Ganacsiga Warshadaha & Beeraha Puntland ............ **Bogga. 37 - 45**
- **Sharci Lam.** 8 ee 23/01/2000, kuna saabsan Qaynuunka Sanduukha Dhaqaalaha ............ **Bogga 46 - 47**

**Qaybta Labaad**

Xeer

Waxba maleh

**Qayta Saddexaad**

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

**Waxba ma leh**

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

*WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA*

MINISTRY OF COMMERCE AND INDUSTRY

L. 7

**Ujeeddo: Dhismaha Rugta Ganacsiga Warshadaha & Beeraha Puntland**

Madaxwaynha Dowlad Goboleedka Puntland ee Soomaalliya.

Isagoo arkay qodobka___ ee Axdiga Dowlad Goboleedka Puntland ee Garowe___

Markuu arkay sharciga lam___ee ___

Markuu Tixgaliyay taladii W.Ganacsiga iyo Warshadaha.

Markuu dhageystay Golaha Wasiiradda

Markuu arkay ansixinta Golaha Wakiilada.

Wuxuu soo saaray sharciga soo socda:

## QAYBTA 1aad
## QODOBKA 1-aad
## Qeexidda Rugta

1. Sharicagaan waxaa lagu dhisay rugta gancasiga, Warshadaha iyo Beeraha ee P/land.
2. Rugtu waa hay'ad madax bannaan oo leh jiritaan iyo shakhsiyad sharciyeed, xirri toos ahna la leh Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.
3. Rugtu waxay kulminaysaa: ganacsatada, warshadlayda, beeraleyda, kaluumaysatada iyo xoola dhaqatada, waxayna u hogaansameysaa sharciga iyo sharciyada kale ee dalka.
4. Rugta xarunteedu waxay noqonaysaa Boosaaso laamana waxay ku yeela kartaa dhamaan goboladda iyo meeshii ay dan u aragto.

## QODOBKA 2aad
## Ujeeddooyinka rugta (Objectives)

1. Wakiil ka noqoshada Ganacsatada, Beeraleyda Puntland kana shaqeynaysa horumarinta qaab xirfadeedka ganacsatada iyo beeraleyda.
2. U horseedidda horumarinta dhaqan dhaqaale ee dalka, dhiirigalinta wax soo saarka iyo kobcinta wax dhoofinta.
3. Raadint a suuqyo dibadeed ee ku haboon wax u dhoofinta khayraadka dalka iyo kuwa kale ee ku haboon wax ka soo dhoofsashada.
4. Uruurinta, isku dubaridka, faafinta qoraalada iyo wargeysyada (Documents) ee saameeya Ganacsiga, Warshadaha, Beeraha, Xoolaha iyo Kaluunka
5. Uruurinta iyo xafidaada namuunadaha (samples) kala duwan ee alaabooyinka la dhoofsho iyo kuwa la soo waarido.
6. Ka howlgalka ku dhiirigalinta ganacsatada abuurista iyo abaabulidda warshado yar yar (light industries).
7. Abuurista iyo abaabulidda qaab shirkadeynta ganacsatada.
8. La socod siinta ganacsatada dhaqdhaqaaqa ganacsi ee gudaha iyo dibadda.
9. Qaban qaabinta carwooyinka gudaha iyo ka qayb galka kuwa aduun-weynaha ee caalamiga ah.
10. U dhexeynta Dawladda iyo hantileyda gaar ahaaneed iyo u kala gudbinta labada dhinac talooyinka iyo ka wada tashiga arimaha khuseeya horumarinta dhaqan-dhaqaale ee dalka iyo la-diyaarinta shuruucda cusub ee saameeya dhaqaalaha.
11. U diyaarinta ganacsatada iyo beeralayda kala duwan tababarro la xiriira kor u qaadidda wax soo saar ee dalka gudihiisa iyo dibaddaba.
12. U-kuur-galka iyo wax ka qabadka aafooyinka ka hor yimaada dhaqaalaha dalka iyo talo ka bixinta sidii dowlada iyo shacbiga looga hortagi lahaa iyadoo lala kaashanayo ciddii aqoon u leh xal u helidda aafada
13. Magacaabida ka qayb galayaasha shirka iyo siminaarada caalamiga ah ee khuseeya howsha rugta.
14. Ka taakuleynta hantileyda gaar ahaaneed sidii ay u heli lahaayeen maaalgalin haya'daha gudaha iyo dibada.
15. Abaabulka, xiriirka iyo iskaashiga rugtu layeelanayso ururada carbeed, kuwa goboleed iyo kuwa caalamiga ahba.
16. Dhirii galinta howl kasta oo horu marinaysa dhaqaalaha dalka.
17. Ka qayb qaadashada dib-u-dhiska dhaqaalaha dalka iyo nolosha bulshada.

## QODOBKA 3aad
## Adeega Guud ee Rugta

b) Bixinta shahaado asal ah (certifacate of origin) ee laraacsho alaabooyinka dalka laga dhoofsho oo dhan.

t) Xaqiijinta waraaqaha iyo caddaymaha ay tahay Rugtu in ay bixiso sida caddaynta xubnaha Rugta.

j) Caddeynta qaansheegyada ganacsi (To certify commercial invoices).

**QODOBKA 4aad**
**Dhex dhexaadinta ganacsatada (Arbitration).**

b) Rugtu waxay dhex dhexaadinaysaa marka laga codsado, muranka saameeya ganacsatada ee ka dhex dhaca ganacsatada gudaha ama kuwa gudaha iyo ganacsatada dibada go'aankooduna waa kama dambeyn.

t) Habka dhexdhexaadinta farqada (b) ee qodobka afaraad waxaa loo cuskanayaa xeer hoosaad u gaar ah.

**QAYBTA 2aad**
**QODOBKA 5aad**
**Xubinmada Rugta**

1. Rugta waxaa xubin kanoqon kara qof ama cidii kasta oo u haysata hanti in uu fuliyo howl laxidhiidha dhaqaalaha dalka gudihiisa, kana diiwaan gashan rugta, bixiseyna kharashka rugta (chamber fee) ahna reer Puntland ama Soomaali degan Puntland.

2. Xubnimada rugta waxa lagu codsanayaa qoraal ayadoo lagu soo lifaaqayo warqadaha cadaynaya arimaha ku sheegan farqadda 1aad ee qodobkan.

3. Xubinimada rugta waxaa lagu waayeyaa marka ay xubin ku kacdo fal ama falal ka hor imaanaya u jeedooyingka ruta loo dhisay.

**QODOBKA 6 aad**
**Golaha Guud ee Rugta (General Assembly)**

1. Rugtu waxay yeelanaysaa Gole Guud oo ka kooban xubnaha rugta ee isugu jira ganacsatada, warshadleyda, beeraleyda, xoolo-leyda iyo kaluumasatada, rugtana xubin ka ah.

2. Golaha Guud ee rugta ayaa leh awoodda ugu sareysa ee maamulka rugta.

3. Shirka Golaha Guud waxaa kaqayb gali kara xubnaha rugt oo kali ah iyo xoghayah guud oo aan cod lahayn.

**QODOBKA 7 aad**
**Xilka Golaha Guud**

1. Doorashadda Guddiga maamulka ee rugta.
2. Dajinta siyaasadaha guud ee lagu maamulo rugta.

3. Ansixinta miisaaniyadda rugta.
4. Magacaabidda ama doorashadaGuddoomiyaha, ku-xigeenada iyo xubnaha guddiga hanti dhowrka rugta.
5. Magacaabidda ama doorashada xubnaha Guudiga Maamulka.
6. Ansixinta xeer hoosaadka Golaha.
7. Talo kabixinta arimaha la xidhiidha fulinta howlaha rugta.

## QODOBKA 8aad
## Shirka Golaha Guud ee Rugta

1. Shirka Golaha Guud ee rugta ee caadiga ah waxaa la qabanayaa sanadkiiba hal mar.
2. Xubnaha Golaha waxaa lagu wargelinayaa qoraal lugu gaarsiinayo nin walba rugtiisa laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda iyo qalabka warbaahinta ugu yaraan 15 cisho ka hor kulanka.
3. Shirka Golaha Guud ee rugtu wuxuu ku furmayaa aqlabiyad caadi ah, codeytuna waa hal dheeri.

4. Haddii tirada xubnaha Goluhu dhammaan-weydo (badh iyo hal) shirka waxaa dib loo dhigayaaa muddo dhan 15 casho, haddii mar labaad tirada xubnuhu dhammaan-weydo tiradii loo baahan yahay waxaa dib loo dhigayaa 7 casho oo kale, xubnaha kulanka danbe ka soo qayb galaa hadday saddex meelood oo meel (1/3) yimaadaan shirka Golaha Guud waa furmayaa hase ahaatee haddii wali mar saddexaad tiradu buuxsami weydo, waxaa waajibaya in guddiga maamulka ee rugtu isu casilo si toos ah, ka dibna xoghayaha guud ee rugtu ku dhawaaqo is casilaada ku timi Golihii maamulka ee rugta, shirweyne hor lehna ku baaqo.

5. Codeynta shirku waxay ku ansaxaysaa kala bar iyo hal cod inta fadhida.
6. Golaha Guud ee Rugtu wuxuu yeelan karaa shir aan cadi ahayn, haddii ay la noqoto Guddiga maamulka ee rugta ama ay qoraal ku codsadaan (1/5) xubnaha golaha guud ee rugta, iyaga oo keenaya ajende iyo hawl/barnaamij (program) falan qeyn mudan.

7. Doodaha Shirka dhamaantood iyo go'aamada shirka waa ladiiwaan galiyaa waxaana wada saxiixaya diiwaanka Gudoomiyaha iyo Xoghayaha guud ee rugta.

## QODOBKA 9 aad
## Guddiga Maamulka ee rugta.

1. Rugtu waxay yeeanaysaa Guddi maamul oo ugu badnaan 15 xubnood oo ay ku jiraan Guddoomiyaha iyo 2-da ku-xigeen.
2. Xubinkasta oo katirsan Golaha Guud ee rugta waxay xaq u leedahay in ay isu sharaxdo guddiga maamulka ee rugta, waana la soo shirixi karaa xubin maqan waxaa soo sharixi kara Toban (10) xubnood sidaasna waa lagu dooran karaa, haddii ay shuruudaha xubinnimada buuxisay.

3. Xubin kasta ee ka tirsan Golaha Guud ee Rugta waxay xaq u leedahay in ay isu sharaxdo guddiga maamulka Rugta. xubin maqan waa la sharaxi karaa haddii ay sharuudaha xubinimada buuxisay, waxaana soo sharixi karaa toban (10) xubnood oo Golaha ka mid ah.

4. Xubin kasta oo loo doortay Guddiga maamulka rugta wuxuu xilka haynayaa labo sano, kana bilaabanta maalinta ladoortay.

5. Xubinnimada guddiga maamulka rugtu waxay joogsanaysaa haddii (3) saddex jeer oo isku xiga ay ka maqnaato shirarka guddiga maamulka ee rugta sabab la'aan.

6. Xubinnimada, guddiga maamulka rugta ee bannaanaata waxaa magacaabaya Guddoomiyaha waxaana ogolaanaya Guddiga maamulka ee rugta, sidoo kale kalfadhiga ugu horeeya ayaa Golaha laga ansixinayaa.

7. Xubinnimada Guddiga maamulka ee rugta ee kutimaada beddel xubinnimo joogsatay, waxay muddadeedu tahay muddada ka harsanayd xubinimada joogsatay.

8. Shirka guddiga maamulka ee rugta doodihiisa iyo go'aamadiisana waxa lagu qorayaa diiwaan ugaar ah oo ay saxeexayaan gudoomiyaha iyo xoghayaha guud ee rugta.

## QODOBKA 10-aad
## *<u>Xilka Guddiga Maamulka ee Rugta.</u>*

1. Hirgalinta ujeedooyinka rugta loo dhisay oo dhan iyo talinta go'aamada ay soo saaraan golaha guud ee rugta.

2. Guddiga maamulka ee rugta waxay yeelanayaan guddiyo inta ay u baahdaan, wayna adeegsan karaan xubin aan ku jirin guddiga maamulka oo aqoon looga maarmi waayey.

3. Ogolaansho miisaniyad sanadeedka inta aan lageyn golaha guud ee rugta.

4. U-gudbinta miisaaniyadii dhamaatay guddiga hanti dhowrka.

5. U-soo bandhigidda wax qabadkii guddiga labada kalfadhi dhexdooda guddiga guud ee rugta.

## <u>QODOBKA 11aad</u>
## **<u>Shirka guddiga Maamulka ee Rugta</u>**

1. Guddiga maamulka ee rugtu wuxuu shirayaa bishiiba halmar iyo kolkii loo baahdo.

2. Shirka guddiga maamulka wuxuu ku ansaxinayaa aqlabiyad caadi ah (waana nus iyo haldheeri) codayntu waa haldheeri.

## QODOBKA 12-aad
## Xilka gudoomiyaha rugta

1. Waa hogaamiyaha guud ee rugta.
2. Waa gudoomiyha dhamaan shirarka Golaha Guud ee rugta iyo golaha maamulka rugta.
3. Waa fuliyaha howl-maalmeedka rugta oo dhan .
4. Isugu yeeridda shirka golaha guud iyo kan guddiga maamulka ee rugta .
5. Hubinta fulinta go'aamada shirka golaha guud iyo kan guddiga maamulka ee rugta.
6. Wakiil ka noqoshada rugta maxkamadaha hortooda ama u wakiilashada qareemo.
7. Saxiixa hashiisyada rugtu ay gasho iyo arimaha kale ee muhiimka ah .
8. Marka gudoomiyaha rugtu maqanyahay waxaa xilkiisa sii haynaya gudoomiye kuxigeenka 1aad sida ay u kala horeeyaan.

## QODOBKA 13aad
## Xoghayaha guud ee rugta

1. Rugtu waxay yeelanaysaa xoghaye guud, waxaana soo jeedinaya Wasaaradda Ganacasiga iyo Warshadaha, waxaana magacaabaya Madaxweynaha.

## QODOBKA 14aad
## Xilka xoghayaha ee rugta

1. Habsami usocod siinta iyo agaasimidda hanaanka maamulka ee howl maalmeedka rugta.

2. Xoghayaha guud ee rugta waxaa hoos imanaya dhamaan shaqaalaha rugta, wuxuuna mas'uul ka yahay howlgalintooda iyo qiimaynta waxqabadkooda.

3. Xoghayaha guud ee rugtu waa xoghaynta golaha guud ee rugta iyo gudiga maamulka ee rugta.

4. Xoghayaha guud wuxuu leeyahay marka shirarku socdaan, dood-cadayn hasayeeshee malaha cod bixin

5. Xoghayaha guud isaga oo latashanaaya gudoomiyaha wuxuu soo diyaarinayaa ajandayaasha shirka, warbixin sanadeedka, misaaniyadda, xisaabinta miisaaniyaddii hore.

6. Isku xidhka golayaasha iyo Wasaaradda ganacsiga iyo warshadaha.
7. Ururinta xogta dhabta ah ee ganacsiga iyo tala ku wargalinta wasaaradda

**QODOBKA 15aad**
**Shaqaalaha rugta.**

1. Rugtu waxay yeelanaysaa shaqaale u gaar ah.

2. Guddiga maamulka ee rugta ayaa leh xilka shaqaalaynta, dalacsiinta mushahaarada iyo gunna siinta, fasaxa, ganaaxa, abaal marinta iyo shaqo kajoojinta shaqaalaha markuu usoo jeediyo xooghayaha guud guudoomiyaha guudna ku qanco ayadoo latixgalinyo sharuucda shaqaalaha ee dalka u degsan.

**QAYBTA 3aad**
**QODOBKA 16aad**
**Maaliyada iyo hantida rugta.**

**Rugta waxaa dakhligu kasoo galayaa qaybaha hoos ku qoran:**

1. Khidmadda diiwaan-galinta (membership registration fee)
2. dhigaal sanadeedka laga qaado xubnaha rugta (annual subscription fee)

3. khidmadda laga qaado adeegyada ku sheegan qodobka 3aad ee sharcigan lam______
4. kaalmo ay kahesho dawladda ama cid kale.

**QODOBKA 17aad**
**Khidmadda diiwaan galinta (Registration fee)**

1. Cidkasta oo xubin ka noqota rugta waxay bixinaysaa khidmadda diiwaan galinta.

**QODOBKA 18aad**
**Khidmadda dhigaal Sanadeedka (annual subscription fee)**

1. Shirkad ama Shakhsi kasta oo leh jiritaan sharci ah oo xubin ka ah rugta wuxuu bixinayaa dhigaal sanadeed (annual subscription fee).

**QODOBKA 19aad**
**Go'aaminta khidmadaha**

1. guddiga maamlka ee rugta ayaa go'aaminaya khidmadaha ay rugtu qaadayso.

2. Khidmadaha lagu qaadayo adeegyada ku tilmaaman qodobka 3aad ee xeerkaan waxaa wada jir u go'aaminaya Guddiga maamulka rugta iyo wasiirka Wasaarada ganacsiga iyo warshaddaha.

**QODOBKA 20aad**
**Kharakhka rugta (Expenditure)**

1. Kharashka ku baxaya hergalinta hawlaha rugta waxaa lagu bixinayaa dakhliga rugta.
2. Rugtu waxay awood u leedahay in ay maagalin sameyso, markay u suurta gasho.

**QODOBKA21aad**
***Miisaanityadda rugta (Budget)***

1. Guddiga maamulka rugtu wuxuu diyaarinayaa miisaaniyadda dakhliga iyo kharashka laba bilood ka hor dhamaadka sanad maalliyeedka, iyagoo horgeynaya shirka Golaha Guud si loo ansixiyo.

**QODOBKA 22aad**
**Xisaab Xidh (Balance Sheet)**

1. Guddiga maamulka rugta wuxuu diyaarinayaa xisaab xidhka saddexda bilood ee ugu soo horeysa sanad walba, sannadkii tagey miisaaniyadiisii, iyadoo la horgeenayo shirka Golaha Guud ee rugta si uu u ogalaado.

2. Golaha Guud ee rugta markuu dhageysto warbixinta Guddiga Hanti dhowrka ee rugta, ayuu go'aan ka gaadhayaa ogolaanshaha miisaaniyadda iyo xisaab xidhka.

**QAYBTA 4aad**
**Qoddobka 23aad**
**Guddiga Hanti dhowrka rugta**

1. Rugtu waxay yeelanaysaa Guddi Hanti dhowr oo laga soo dooranayo ama laga magacaabayo xubnaha rugta, aqoon xeel-dheerna u leh cilmiga xisaabaaka (accountancy), waxaana eedeynta ugu danbeysa Hanti-dhawrka guud.

2. Guddiga Hanti dhowrka rugta, muddadoodu waa laba sanno kana bilaamaysa taariikhda la doorto.

3. Haddii xubnaha Guddiga Hanti dhowrka ay xilkooda gudan waayaan caafimaad awgii ama xilka laga qaado ama ay iscasilan waxaa xubinbimadii buuxinaya xubinta tirada codkii ay heleen ku xigta .

4. Xubnaha guddiga maamulka rugta waxaa ka reeban in ay Guddoomiye ama xubin kanoqdåan guddiga hanti dhawrka rugta.

# DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
## AGAASINKA GUUD EE SHAQADA IYO SHAQAALAHA

### QAANUUNKA SANDUUQA SHAQAALAHA

L. 8

1-Iyadoo la tixraacayo Sharciga lambarkiisu yahay 65 ee soo baxay 18,oktoobar,1980 Qodobkiisa 22aad, oo lagu hormariyey Shaqaalaha Soomaaliya,iyo isla Sharciyada kale ee lam 5 ee soo baxay 2dii,feb,1980 iyo Sharciga lam19,ee soo baxay 3,feb,1977, oo dhamaantood ku saabsan abuurid saldhig dhaqaale si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha korna loogu qaado daryeelka iyo danaha Shaqaalaha D.G.PL, maadaama uu Shaqaaluhu yahay lafdhabarta wax soosaarka loona baahan yahay in la tixgeliyo mudnaanshaha Shaqaalaha, si uu u awoodo inuu guto waajibaadka saaran kana qaato doorkiisa waxku oolka ah hawlaha lagu horumarinayo D.G.PL Maskax ahaan iyo muruq ahaanba.

Sidaas darteed waxaa la waajibiyey Sanduuqa Shaqaalaha, iyadoo qof kasta oo qaata Mushahar Bileed kana tirsan Shaqaalaha Wasaaradaha,Hay'adaha madaxa banaan,Dawladda hoose, Mashaariicda, Shirkadaha iyo Hay'adaha Caalamiga ah laga jarayo Mushaharkiisa 1% (boqolkiiba hal) bil kasta.

Lacagtaasi marka dhab ahaan loo fiiriyo waa qaddar aad u yar hase yeeshee marka ay soo wada xerooto waa dhaqaale wax lagu qaban karo, waxaana laga leeyahay himilo horumarineed oo mustaqbalka ah.

### 2- ILAHA DHAQAALAHA EE SANDUUQA

Ilaha Dhaqaalaha ee Sanduuqa Shaqaaluhu waxay ka iman karaan:-

1. Mushahar bileedka shaqaalaha oo laga jaro 1%(boqolkiiba hal)
2. Lacagaha ka soo xerooda Ganaaxa Shaqaalaha.
3. Mushaharka Shaqaalaha ka maqnaada goobta shaqada muddo ka badan (7) todoba Beri sabab la'aan
4. Kabida Dawladda ee sanduuqa Shaqaalaha
5. Deeqaha Hay'adaha Caalamiga ah
6. Abuuris illo Dhaqaale oo Shaqaaluhu samaysto,sida Baararka, Huteelada, Masnacyada (Work shops) IWM.
7. Deeqaha Ganacsiga gudaha IWM.

### 3- WAXA LAGU QABANAYO LACAGTA SANDUUQA

1. Daabacaada Shuruucda shaqaalaha D.G.PL.
2. Samaynta Dukumiintiga Shaqaalaha D.G.PL sida buugta lacag qabashada iyo kharash bixinta
3. Samaynta aqoonsiga Shaqaalaha (tesare)
4. Duugta Shaqaalaha
5. Kaqayb qaadashada Tababarada iyo Waxbarashada Shaqaalaha
6. Furitaanka Baararka Shaqaalaha
7. Kaqayb qaadashada Difaaca Dalka

**Qodobka 24aad**
**Awoodda Guddiga Hanti dhawr**

1. Guddomiyaha iyo xubnaha Guddiga Hanti dhawrka ee rugta waxay awood buuxda u leeyihiin in ay wada jir buuggaagta iyo warqadaha rasmiga ah ee xisaabta Rugta u baadhan, iyaga oo qax u leh in ay helaan wararka ku saabsan xisaabaadka ay doonayaan.
2. Guddiga Hanti dhawrka Rugta, waxay warbixintooda u gudbinayaan Golaha Guud ee Rugta.

**Qaybta 5aad**
**Odobka 25aad rugta**
**Xeer hoosaadyada rugta**

Guddiga maamulka Rugtu wuxuu dejinayaa xeer hoosaanyada sharcigana tilmaamaya oo kala ah :-

1. Xeerka maamulka Rugta (chamber adininistrative Regulation)
2. Xeerka xilka iyo waxqabadka Guddiyada Guddiga maamulka Rugta.
3. Xeerka Doorashada Guddiga maamulka iyo guddiga Hanti dhawrka ee Rugta iyo.
4. Xeerka dhexdhexaadinta muranka ganacsiga (Arbilration) iyagoo la kaashanaya Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha.

**Qodobka 26**

Heshiisyada ay Rugtu gelayso waxay noqon doonaan kuwo aan ka soo horjeedin siyaasadda Qaran, dhaqaale iyo sharuucda dalka.

**Qodobka 27 aad**
**ilaalinta guud**

Ilaalinta Guud (supervision) Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha iyo rugtu waxay yeelanayaan xidhiidh wada shaqayn toos ah iyada oo Wasiirku leeyahay awoodda ilaalinta guud in howlgalka Rugtu waafaqsan yahay sharcigaan.

**Qodobka 28 aad**
**Dhaqan galka sharcigan.**

Sharcigani wuxuu dhaqan geleyaa marka uu saxiixo madaxweynaha Dowlad Gaboleedka Puntland ee Soomaaliya laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

C/laahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Puntland

**23/01/2000**

8. Kormeerka goobaha Shaqada
Shirarka Shaqaalaha

## 4- HABKA SOO XERAYNTA LACAGTA SANDUUQA SHAQAALAHA

Waxaa masuul ka ah una xil saaran soo xeraynta lacagta Sanduuqa Xisaabiyeyaasha Hay'adaha aan kor ku soo sheegnay, iyagoo raacaya habkan oo qoraal ahaan loogu gudbinayo, xisaabiyuhu marka uu qabto lacagta sanduuqa wuxuu si dhakhso ah ugu shubayaa Bankiga ugu dhow ee ay ka furan tahay xisaabta socota ee Ag. Guud ee shaqaalaha, isaga oo ka qaadanaya rasiidka bankiga (Bank receipt) cadaynaya inuu xereeyay lacagtaas oo aan waxba ka dhinayn kadibna uu la socodsiiyo kormeeraha agaasinka shaqada iyo shaqaalaha ee goobtaas.

Meelaha ama Degmooyinka aan lahayn bangi xisaabiyuhu wuxuu ku wareejinayaa Guddoomiyaha Degmada isaga oo ka qaadanaya rasiid cadaynaya cadadka lacagta uu ku wareejiyey .
Wakhtiga uu wareejiyey iyo waliba magaca Degmada uu ku wareejiyey . Isla mar ahaantaa xisaabiyuhu wuxuu war bixin tafatiran u soo gudbinayaa Agaasimka Shaqada iyo Shaqaalaha .

Guddoomiyaha Degmadu wuxuu ku shubayaa lacagta sanduuqa ee lagu wareejiyey Bangiga ugu dhaw ee D.G. Puntland, isaga oo u soo diraya Agaasimka Guud ee Shaqada iyo Shaqaalaha wixii fahfaahin ah .
Isla mar kaana Guddoomiyaha Degmadu wuxuu hawshaas xiriir toos ah kala samaynayaa kormeeraa Shaqada iyo Shaqaalaha ee Degmadaas .
Hubinta iyo daba galka hawshaasi inay u fushay sidii loogu talagalay waxaa u xilsaaran qaybta kormeerka ee Agaasimka Guud ee Shaqada iyo Shaqaalaha .

**5.** Qaanunkan wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynuhuna saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawlad Goboleedka Puntland .

Guul Eebe iyo Wada Shaqayn Wacan .

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland
**23/01/2000**